



Halkad ka bilaabi karto: Fahamka heerka uu horumarka waxbarashada iyo shaqeyntu mareyso

(A Place to Start: Understanding the present level of academic achievement and functional performance statement - Somali translation)

Kooxda qorshaha waxbarashada gaar-ahaneed, (ee lo yaqaan Individualized Education Plan IEP Team) waxey donayan in adeegyada loo fidinayo ardeyga ay qanciyaan baahida qaaska oo ay leyihiin, oo ay u carbiyan waxbarasho ama shaqaleyn mustaqbalka ah.¹ Waxey kalo doonayan in adeegyadan ka saacidan ardeyda in ay si xor ah u noladaan. Kooxdan iyago sal u ah horumarka ardeyda, iyo dejinta goolasha, waxey koosdu aqoonsananeysa:

- Heerka waqtiga xaadirka ah uu ardeygu ka marayo waxbarashada iyo horumarak
- Saameynta laxaad daradu ku yeelan karto waxbarashada

Nidaamkan si aad ufahamto, waxa loo barbar dhigi sidi ado safar u aadaya magaalo kale: Waxad u baahantahay in aad ogato halkaad ka bilaabeyso, iyo waxyaabaha safarkaga dib u dhac ku noqon kara. Kooxdu waxey derseysa halka ilmahaagu ka bilaabay, iyo dib-udhaca nafadeed sameynta uu ku yeelanayo.

Koxda, oo ay waalidku ka mid yihiin, su'aalahan muhiimka ayeey is weydinayan kulan sanadeedka ee waxbarashada gaar-ahaneed:

- Maxey tahay naafada ardeygu leeyahay ee saameyn ku yeelaneysa horumarkooda iyo ka kheyb qaashada waxbarashada daraasada fasalka caadiga ah?
- Xagu waxbarashada iyo shaqeynta ka maraya ardeygu waqtiga xaadirka ah? (Wa halke halka uu ardeygu ka bilaabay?)²
- Xeelado nocee ah, wafajin iyo qalab ardyga ka saacidaya waxbarashada? Wax qalab ah oo loo qiimeeyay ardyga in ay ka saacidayan waxbarashada ma jiran?
- Wa maxay heerka wabarasho ee laga filayo fasalka uu ardeygu marayo? Xirfadahiisu side ula heer yihiin heerka?³
- Ardeygu ma u dhaqma oo wax ma u baran kara heerka xirfadaha ardeyda la faca ah?
- Side ardeygu u dhaqma jawiga aan waxbarashada aheyn? (Akhbaarada lag helay qoyska)
- Maxu ardeygu u maleynaya in ay waxtarayan, ama aysan waxtareyn waqtiga dugsiga
- Wax akhbaaro kale ah oo aan u baahanahay in la qadariyo miya jira si aan u ogaano ardeyga guud ahaan?⁴

¹ Individuals with Disabilities Education Act (IDEA) 601(d)(1)

² As used in special education, functional means routine activities of everyday living. Federal Register, August 14, 2006, Analysis of Comments and Changes, page 46661.

³ Minnesota follows a set of academic standards in language arts, math, social studies, English language proficiency and science for kindergarten through 12th grade. The standards describe what all students in a particular grade are expected to know and be able to do. School districts have chosen various curricula to teach these skills to their students.

⁴ See PACER's handout "Six Areas that May Affect IEP Services" PACER.org/parent/php/php-c221.pdf

Jawaabaha su'aalahan sanad walba waxa loo diwaan gelinaya oo lagu qoraya qorshaha waxbashada gaar-ahaneed si heerka uu horumarka waxbarashada iyo shaqeyntu mareyso. Qorshaha ardeyga ee waxbarashada gaar-ahaneed ee sanadka aya ah qariidad lagu gaarayo heerka bilowga horumarka iyo heerka horumarka la doonayo in ardeyda la gaarsiyo. Goolasha qorshaha waxbarashada gaar-ahaneed.

Warbixintan ah heerka uu horumarka waxbarashada iyo shaqeyntu ardeydu marka mareyso (waxa loo yaqan Present Level of Academic Achievement and Functional Performance PLAAFP) Warbixintan waxey na siineysa sawir kooban oo ah halka ardeydu waqtiga xaadirka ah marayaan. Waxey warbixintu qeexeysa heerka ardeygu waqtiga ka marayo waxbarashada iyo shaqeynta. Tani waxa ka mid ah faafaahin kartida ardeygu leeyahay, iyo baahida. Meelaha kooxda ay qadarineysa waxa ka mid ah:

- Tacliinta
- Xiriirka
- Shaqeynta
- Garashada-maskaxeed guud ahaan
- Caafimaadka
- Dhaqdhaqaaqa jirka
- Dareenka (sida araga iyo maqalka)
- Dareenka iyo Busha la-dhaqanka
- U gudubka dugsiga sare kadib iyo keli nolaasha (Transition to post-secondary adult living) (taso bilaabata fasalka 9aad)

Warbixinta heerka uu horumarka waxbarashada iyo shaqeyntu mareyso (PLAAFP) waxa ka mid ah akhbaaro isku dhafan oo ay ka mid yihiin:

- Heerka uu sanadki hore gool ka-gaarku ku dhamaaday
- Qiimeyn waxbarashada gaar-ahaneed hadey jiraan
- Halku ardeygu ka gaaray imtixanadda degmada ama gobolka, oo ay ka mid yihiin xirfadaha imtixaanka uu bartay
- Darajada fasalka iyo akhbaarada warbixinta macalimiinta oo ay ka mid yihiin dhaqanka ardeyga
- Akhbaarada ay bixiyan ardeyda iyo waalidka (walid ah'aan waxad heysa akhbaaro muhiim ah oo aad la wadaagi karto shaqaalaha dugsiga. Waxa laga yaba in adiga iyo shaqalaha dugsiga in aragti kala duwan u leedihiin ilmahaga, markey jogan jawi kala duwan ama ku jiran xaalado kala duwan
- Waxyaabaha ardeygu xiiseynayo ama ku wanaagsan yahay, oo ay ka mid yihiin waxyaabaha aan tacliinta la xiriiirin (tan waxa laga yaba in lagu ogaado akhbaaro muhiim ah, oo noqon kara xirfado ardeygu leeyahay, oo suura gelin karta waxbarashada, ama dhiira gelin karta ardeyga)
- Waxi xeelada ah, waafajin ah, qalab ah, ama adeegyo ah ee la ogaaday in guul leedahay

Wa muhiim in la ogaado macalimiinta fasalada tacliinta caadiga ah, oo xubno qasab ka ha kooxda waxbarashada gaar-ahaneed, in ay muhiim yihiin.⁵

- Macalimiintan waxey garanayan ardeyda guud ahaan halka laga filayo d'a ahaan iyo draja ahaan. Dabadeed waxey garan karaan halka ardeygu marayo marka loo barbar dhigo ardeyda kale oo ay isku faca yihiin
- Kooxda wa in ay hubisa in macalimiintan fasalada caadiga ee la shaqeynaya ardeyga, la yimaadan kulanka waxbarashada gaar-ahaneed akhbaaro munaasab ah. Mitalan waxa laga yaba macalin dhiga art in uu yahay/tahay malinka ardeyga, oo aysan aqon u laheyn ardeyga xirfadda akhriskiiisa ama xisaabta.

⁵ Sharciga Xuquuqaha waxbarashada dadka naafada ah (IDEA) waxu faraya in degmada dugsiga u qoondayo hal macalin oo ka qeyb qaata kulanka waxbarashada gaar-ahaneed, hadi ardeygu kheyb ka qaato xarakaadka ardeyda fasalada caadiga ah ee sanad dugsiiyeedka. Inkasto waalidku ogolaan karo in macalin laga fasaxi karo kulanka iyado qoraal ah, Heyadda PACER waxey kula talineysa waalidka in macalimiinta qasabka ah in ay ka mid ahaadaan oo dhan ka kheyb qataan kulanka, si qorsho munaasab ah loogu sameeyo ardeyga.

- Iyado ay ku xiran tahay waqtiga sanadka ee kulanka la qabto, waxa laga yaba macalinka/madda sanadka dambe in ay ku haboon tahay kulanka marka la qorayo qorshaha waxbarashada gaar-ahaneed.
- Macalimiinta kale wey ka kheyb qaadan karan ama reboor ay ka qoreen ayeey keeni karan.

Qeybta lagu qorayo warbixinta heerka horumarka waxbarashada iyo shaqeyntu mareyso (PLAAFP), ee qorshaha waxbarashada gaar-ahaneed, wa in uu ahada mid kooban, fasiix ah, toos ah iyo xaqiiqa ah. O oleh akhbaaro ku filan oo qeexaya xirfadaha ardeyga marka awoodo oo la cabiri kara. Hadi darajada tacliinta ardeyga la diwaan gelinayo, wa in ay ahadan kuwa tafsiir u baahneen ama la fasira.

Warbixinta heerka uu horumarka waxbarashada iyo shaqeyntu mareyso (PLAAFP) waxey horsedeysa in la abuurro goalal sanadeed, waafajin, hab-doorin, iyo adeegyo kale. Goolasha qorshaha waxbarasghada gaar-ahaneed wa in la xiriiran warbixinta heerka uu horumarka waxbarashada iyo shaqeyntu mareyso. Waalidka aqoon wanaagsan u leh warbixinta heerka uu horumarka waxbarashada iyo shaqeyntu mareyso, waxey xubno anfacaad leh ka noqdan kooxda, oo waxey ilmahooda ka sacidan in ay guul sare garaan.